

## **Arday Kasta Wuu Naga Mid Yahay Hagista ku saabsan Arrinta Xoogsheegashada**

Agoosto 2021

Xoogsheegashada ka dhacda dugsiyada waa arrin halis ah waxayna mudan tahay feejignaan xooggan inay siiyaan shaqaalaha dugsiyada iyo bulshada guud ahaan. Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) waxaa ka go'an inay hubiso badqabka iyo faydaqabka si loo kobciyo jawi dugsiyeed caafimaad iyo taageero leh oo ka madax-bannaan dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho, oo ay ku jiraan falalka xoogsheegashada internet-ka. Dugsiyada Oregon waxaa laga filayaa inay hubiyaan mahadhooyin waxbarasho oo tayo leh, oo udub dhexaad u ah xiriirto isku xiran, daryeel leh oo u dhexeeya ardayda, shaqaalaha, mutadawiciinta, qoysaska, iyo bulshada.

Ujeeddada dukumentigan su'aalaha iyo jawaabaha (Q&A) ah waa in la siiyo macluumaad shaqaalaha dugsiyada, waalidiinta, ardayda, iyo xubnaha bulshada ee khuseeya sharciyadda iyo habraacyada jira ee wax ka qabta dhibaateynta, cagajugleyn, iyo xoogsheegashada ka dhacda dugsiyada dadweynaha ee Oregon. Su'aalahaan & Jawaabahaan waxay ku siinayaan macluumaad kooban oo ay wehliyaan raadraacyo tixraacaya qaybaha sharciga ee khuseeya. Dukumentigan waa in loo adeegsadaa hagiis ahaan, oo lola ma jeedo talo sharciyeed ahaan.

### **1. Miyuu Oregon leeyahay sharci gobol oo mamnuucaya xoogsheegashada dugsiyada?**

Haa. Sharciga Oregon ee la xiriira dhibaateynta, cagajugleyn, iyo u xoogsheegashada ka dhacda dugsiyada waxaa lagu cusboonaysiiyay kalfadhiga sharci-dejinta ee 2021 iyadoo la meel mariyay [HB 2631](#). Sharcigan waxaa lagu dhex qeexay Qaanuunada Dib-loo-eegay ee Oregon, Cutubka 339, Qeybaha 351-364, waxaana laga eegi karaa halkan: [https://www.oregonlegislature.gov/bills\\_laws/ors/ors339.html](https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors339.html).

### **2. Sidee loo qeexaa “dhibaateynta, cagajugleyn, ama xoogsheegashada”?**

Sharciga Oregon wuxuu ku qeexaa “dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho” fal kasta oo:

- Si weyn u farageliya faa'iidooyinka, fursadaha, ama waxqabadka waxbarasho ee ardayga, iyo;
- Dhaca markay tahay ama si dhaqso ah uga dhaca agagaarka dugsiyada, waxqabad kasta oo dugsigukafaalo qaaday, gaadiid-raaca dugsiyada bixiyo, ama boosteejo kasta oo dugsiyeed oo rasmi ah; oo leh saamaynta:
  - Jir ahaan u waxyeellaynta ardayga ama halaynta hantida ardayga;
  - Si ulakac ah u gelinta arday cabsi macquul ah oo waxyeello jireed oo soo gaarto ardayga ama halaynta hantida ardayga; ama
  - Abuuritaanka jawi waxbarasho oo colaadeed, oo ay ka mid tahay saameynaysa faydaqabka maskaxeed ee ardayga.<sup>1</sup>

### **3. Miyuu sharciga Oregon dhigayaa xoogsheegashada internet-ka?**

Haa. Sharciga waxaa ka mid ah xoogsheegashada internet-ka, oo lagu qeexay “u adeegsiga aalad kasta oo isgaarsiin oo elektiroonig ah dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegto.”<sup>2</sup>

### **4. Miyuu sharciga Oregon ka ilaaliyaa kooxaha qaarkood xoogsheegashada?**

Maya. Sharciga Oregon wuxuu ilaaliyaa dhammaan ardayda, isagoo garwaaqsan in xoogsheegashada “laga yaabo inay ku salaysan tahay, balse aysan ku xaddidnayn, xaaladda koox la dhowro ee qofka”.<sup>3</sup>

### **5. Sidee loo qeexaa “koox la dhowro” marka la eego sharciga Oregon?**

Sharciga Oregon wuxuu ku qeexaa koox la dhowro inay tahay “koox dad ah oo la sooco, ama loo arko inay kala soocan yihiin, isir ahaan, midab ahaan, diin ahaan, jinsi ahaan, nooca galmada ahaan, asal qarameed ahaan, xaaladda guur ahaan, xaalad qoyseed ahaan, isha dakhliyeed ama naafonimo ahaan.”<sup>4</sup> [HB 3041](#) (2021) sidoo kale wuxuu ugu daraa nooca jinsiga koox la dhowro oo gaar ah.

### **6. Maxay tahay in degmo-dugsiyeedyada guud sameeyaan si ay ugu hoggaansamaan sharciga?**

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay degmo-dugsiyeedyada inay si rasmi ah u qaataan siyaasadaha:

- Mamnuuca dhibaateynta, cagajugleynta, xoogsheegashada iyo xoogsheegashada internet-ka;
- Uga baahan shaqaalaha inay soo sheegaan ficil dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho;
- U oggolaado ardayda ama mutadawiciinta inay u soo sheegaan dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada si ikhtiyaari ah oo qarsoodi ah;
- Abuuro habraac isku mid ah oo soo sheegida dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada;
- Abuuro geedi-socod ay degmadu raaci doonto marka la baarayo dhibaateyn, cagajuglayn, ama xoogsheegasho la soo sheegay. Geedi-socodkani waa inuu:
  - Aqoosado jagada shaqo ee saraakiisha dugsiga ee mas'uul ka ah qabashada iyo baaritaanka warbixinnada dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada;
  - Aqoonsado habraac uu qofku uga codsan karo degmo-dugsiyeedka inay dib-u-eegaan tallaabooyinka dugsiga marka ay ka jawaabayaan warbixinta dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada;
  - Waa inuu ku jiro bayaanka cawaaqibta iyo tallaabada sixitaanka ee qofka lagu helo inuu ku kacay fal dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho;
  - Mamnuuco aargoosiga ka dhan ah qof kasta oo soo sheega fal dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho; iyo,
  - Aqoonsado tallaabada sixitaanka ee qofka si been-abuur ah ugu soo eedeeya qof kale dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho.<sup>5</sup>

### **7. Waa maxay tallaabooyinka dheeraadka ah ay tahay in degmo-dugsiyeedyadu ka qaadaan siyaasadaha degmo-dugsiyeedka laga bilaabo Luulyo 2021 si loogu hoggaansamo [HB 2631](#)?**

Degmo-dugsiyeedyadu waa inay ku daraan shuruudaha ogeysiinta siyaasadooda mamnuucaysa dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada, iyo mamnuucaysa xoogsheegashada internet-ka.

### **Marka Ogeysiin LOO Baahan Yahay:**

Laga bilaabo 1-da Luulyo, 2021, sharcigu wuxuu uga baahan yahay sarkaalka dugsiga ka mas'uulka ah inuu qabto oo baaro warbixinnada dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada, ama ficil-ka(ada) xoogsheegashada internet-ka si:

- Loo ogeysiyo waalidiinta ama mas'uuliyiinta ardayga loo geystay fal dhibaateyn, cagajugleyn, ama xoogsheegasho, ama fal xoogsheegashada internet-ka ah.
- Loo ogeysiyo waalidiinta ama mas'uuliyiinta ardayga ee laga yaabo inuu ku kacay fal dhibaateyn, cagajugleyn ama xoogsheegasho, ama fal xoogsheegashada internet-ka ah.
- Ogeysiinta waa inay dhacdaa iyadoo laga qaybqaadanayo oo la tixgeliyo baahiyaha iyo walaacyada ardayga loo geystay fal dhibaateyn, cagajuglayn ama xoogsheegasho, ama falka xoogsheegashada internet-ka ah.
- Sarkaalka dugsiga waa inuu ku wargeliyaa ardayga go'aanka lagu ogeysiinayo ogeysiyo waalidka ama mas'uuliyiinta kahor bixinta ogeysiinta.
- Ogeysiinta waa inay si dhaqso ah u dhacdaa marka falal dhaawac jireed loo geystay ardayga; haddii kale, ogeysiintu waa inay waqti macquul ah dhacdaa.

### **Marka ogeysiis AAN LOO Baahnayn:**

Ogeysiinta looma baahna haddii:

- Sarkaalka dugsiga si macquul ah u aaminsan yahay in ogeysiistu halis gelin karto ardayga loo geystay dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada, ama falka xoogsheegashada internet-ka; **ama**
- Haddii dhammaan saddexda ka mid ah kuwa soo socda ay dhacaan:
  1. Ardayga loo geystay dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada, ama falka xoogsheegashada internet-ka uu codsado in aan ogeysiinin waalidka ama mas'uulka ardayga;
  2. Sarkaalka dugsigu uu go'aamiyo in ogeysiinta aysan dan ugu jirin ardayga loo geystay dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada, ama falka xoogsheegashada internet-ka; **iyo**
  3. Sarkaalka dugsiga ku wargeliyo ardayga in sharciga federaalku uga baahan yahay in waalidka ama mas'uulka ardayga ay helaan diiwaanka waxbarashada ardayga, oo ay ku jiraan codsiyo kasta oo ogeysiinta khuseeya.

### **8. Sideen ku heli karaa siyaasadda kahortagga xoogsheegashada ee degmadayda?**

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay degmooyinku inay ka dhigaan siyaasadooda “mid laga heli karo . . . xafiiska dugsiga kasta ama xafiiska degmo-dugsiyeedka, oo haddii la heli karo, mareegta dugsiga ama degmo-dugsiyeedka.”<sup>6</sup>

### **9. Sidee ayuu qof u soo sheegaa walaaca ku saabsan xoogsheegashada?**

Degmo-dugsiyeed kasta waxay leedahay geedi-socod lagu soo gudbiyo ashtakada xoogsheegashada. Ashtako qoran, taariikhaysan

oo wadata xaqiiqooyin gaar ah ayaa ah habka ugu fiican. Si taxaddar leh dib ugu eeg geedi-socodka degmo-dugsiyeedka oo ka weydii su'aalo hawl-wadeenada xafiiska degmo-dugsiyeedka ee ku saabsan habka loo soo gudbiyo ashtakada. Noqo mid ashtako ujeeddeysan oo gaar ah inta suurtagal ah gudbiyo si baaritaan qoto-dheer loo sameeyo.

#### **10. Ka warran haddii aan gudbiyo warbixin oo aanan ku qancin ka jawaab-celinta dugsiya?**

Sharcigu wuxuu u baahan yahay siyaasadda degmo-dugsiyeedka inay oggolaato racfaan heer degmo ah haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta dugsiya ee soo sheegida xoogsheegashada. Raac habraacyada ku qoran siyaasadda degmada ee loogu codsado degmada inay dib u eegto tallaabooyinka dugsiya. Si dhow uga feejignow waqtiyada kamadameysta ee dib-u-eegista.<sup>7</sup>

#### **11. Ma jiraan sharciyo federaal oo kahortagga dhibaateynta, cagajugleynta, iyo xoogsheegashada?**

Iyadoo ku xiran xaqiiqooyinka iyo duruufaha gaarka ah ee xaaladda, waxaa jira sharciyo federaal oo khuseeya kooxaha la dhowro qaarkood marka la eego kiisaska la xiriira dhibaateynta, cagajugleynta, ama xoogsheegashada. Kuwaan waxaa ku jira Qodobka VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga, Cinwaanka IX ee Xeerka Sixidda Waxbarashada, Qeybta 504 ee Xeerka Baxnaaninta, Cinwaanka II ee Xeerka Sixidda Xeerka Naafonimo ee Maraykanka, iyo Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah.<sup>8</sup> Ka doodista sharciyadaan waa mid ka baxsan baaxadda dukumintigan hagista ah. Si kastaba ha noqotee, macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa goobaha soo socda:

Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka (U.S. Department of Education's Office for Civil Rights): <http://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/index.html>

Xafiiska Xaqsoorka, Kala-duwanaanshaha iyo Kaqeybgelinta ee ODE (ODE's Office of Equity, Diversity and Inclusion):

<http://www.oregon.gov/ode/students-and-family/equity/civilrights/Pages/default.aspx>

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:  
Lisa Bateman, Khabiir Waxbarasho  
503.947.5655  
[lisa.bateman@state.or.us](mailto:lisa.bateman@state.or.us)

---

<sup>1</sup> ORS 339.351(2).

<sup>2</sup> ORS 339.351(1).

<sup>3</sup> ORS 339.351(2)(d).

<sup>4</sup> ORS 339.351(3).

<sup>5</sup> ORS 339.356.

<sup>6</sup> ORS 339.356(2)(m)(B).

<sup>7</sup> ORS 339.356(2)(A)(h).

<sup>8</sup> Markay ahayd 26-da Oktoobar, 2010, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka ayaa daabacay [Dear Colleague Letter on school harassment and bullying](#). Markay ahayd 20-ka Agoosto, 2013, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Baxnaaninta ee Waaxda Waxbarashada Maraykanka ayaa daabacay [Dear Colleague Letter specific to students with disabilities](#).

Markay ahayd 21-dii Oktoobar, 2014, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ayaa daabacay [Dear Colleague Letter](#) waxaana wehliyay [Parent Fact Sheet on bullying of students with disabilities](#).